



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maajo 3, 2021

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska ODDS iyo Daneeyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tababar loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed

[Sharciga Senate-ka 1534](#) waxaa lagu ansixiyay Sharci-dejinta Oregon ee 2018-kii. Sharcigu wuxuu Waaxda Adeegyada Dadweynaha farayaa in ay hirgeliso tababar waajib ah iyo shuruudaha imtixaanka oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed oo dhan.

Shuruudahani cusub waa kuwo loogu talagalay shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW) oo dhan ee loo oggolaaday in ay adeegyo iyo taageerooyin siiyaan dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee dhaqaalihiiisa la bixiyo iyada oo la adeegsanayo Medicaid.

Shuruudaha ayaa dejiyay nidaamyo la raacayo oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed oo dhan si loo xaqiijiyo in ay leeyihiin xirfadaha, aqoonta, iyo kartida ay ku bixiyaan adeegyo iyo taageerooyin tayo leh. Tababarka tijaabada ah ee ikhtiyaariga ah waa mid hadda dhacaya waxaana la bixiyaa iyada oo la adeegsanayo Tababarka Carewell SEIU 503.

Hay'adaha Maamulka Kiisku (CME) waxaa dhici karta in ay helaan su'aalo ku saabsan tababaradani oo ka socda shakhsiyaadka ka tirsan adeegyadani iyo xubnaha ka tirsan qoyska kuwaasi oo ku saabsan PWS bixiya adeegyada iyo taageerooyinka.

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waxay ku faraxsan tahay in ay bixiso taageero loogu talagalay sida looga jawaabo su'aalaha aad hesho, oo ay ku jiraan:

- Mawduucyada laga hadlayo, oo ku qoran luqaddo kala duwan, si ay u hagaan wada hadalada ku saabsan shuruudaha la iskaga baahan yahay
- Xiriirada loogu talagalay cidda lala xiriirayo si loo helo macluumaad dheeraad ah, iyo
- Ilo aad si toos ah ula wadaagi karto bulshadaada.

Waxaad Qalabka Xiriirka Hawl-wadaagaha Bulshada ka heli kartaa [website-ka](#) Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon. Website-ku wuxuu leeyahay dokumentiyada Su'aalaha Inta Badan La isweydiiyo, warqad xayeysiis ah, wakhtiga la qabtay iyo soo bandhigid, dhammaantood ku qoran luqaddo badan.

Fadlan sidoo kale tixgeli in aad isqorto website-ka si aad u hesho macluumaad cusub oo ku saabsan mawduucan, iyo in aad dadka aad taageerto, xubnaha ka tirsan qoyska iyo PSW ku dhiirigeliso in ay isqoraan: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/HCC/Pages/Senate-Bill-1534-Updates.aspx>

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.